

# Ri, Eey iyo Sac



- ✎ Fabian Wakholi
- ☞ Marleen Visser
- ➡ Abdi Muse
- 💬 Somali
- 🔊 Level 2




Ri, eey iyo sac baa waxay a haayeen saaxiibo isku wayn. Maalin maalmaha kamid ah waxay aadeen safar waxayna raaceen taksi.



Markay gaadheen dhammaadkii  
safarkooda, darawalka ayaa  
weyiiyay in ey bixiyaan nooligooda.  
Sici waxuu bixiyay lacagtiisi.



Eeygi waxuu bixiyay xoogaa  
dheerad ah, sababtoo ah ma  
uusan haysan lacag sax ah.




Darawalka waxuu siin rabay eeyga  
baaqigiisa markay rida carartay  
ayadoon waxbo bixinin.




Darawalka aad buu u xanaaqay.  
Garrigii buu waday asagoo siinin  
eeygi baaqigiisi.



Taasina waa sababta xitaa maanta,  
eeyga uu ugu ordo gaadhiga si uu  
u qooraansado oo u helo  
darawalkii ka qabay baaqiga.



Rida waxa ay ka carartaa baabuurka xiinkiisa. Waxay kacabsi qabtaa in loo xidho bixin la aanta nooligi.



Saca na dan kamalahan markuu baabuur soo socdo. Saca waxuu qaataa waqtigiisa si uu jidka u gudbo sababtoo ah waxuu og yahay in uu bixiyay nooligiisi si dhameystiran.



# Storybooks Canada

[storybookscanada.ca](http://storybookscanada.ca)

## Ri, Eey iyo Sac

Written by: Fabian Wakholi

Illustrated by: Marleen Visser

Translated by: Abdi Muse

This story originates from the African Storybook ([africanstorybook.org](http://africanstorybook.org)) and is brought to you by Storybooks Canada in an effort to provide children's stories in Canada's many languages.



This work is licensed under a Creative Commons  
[Attribution 3.0 International License](http://creativecommons.org/licenses/by/3.0/).